SIDA LOO CODSADO
OO LOO ADEEGSADO

# DHEEFAHA CUNTADA AASAASIGA AH



Washington State
Department of Social
& Health Services

*Transforming lives*

DSHS 22-297(SM) (Rev. 4/20) Somali

# TUSMADA BUUGGA

HORUDHAC ............................................. 1

## Codsashada Cuntada Aasaasiga ah

Miyaan heli karaa Cuntada Aasaasiga ah? .......................... 2

Sideen u codsadaa Cuntada Aasaasiga ah? .......................... 2

Maxaa dhacaya ka-dib marka aan geeyo codsigayga? ................ 3

Maxaan la imaadaa xilliga wareysiga? .... 4

Maxaa dhacaya haddii ay wax iska beddelaan xaaladaha qoyskayga? ........... 5

Haddii aan xaq-u-leeyahay, goormee ayaan helayaa dheefahayga cuntada? .... 6

Muddo intee le'eg ayaan qaadan doonaa Cuntada Aasaasiga ah? ............. 7

Waaxdu ma leedahay Siyaasad Takoor La'aan? .......................... 8

## Adeegsiga Dheefaha Cuntada Aasaasiga

Waa maxay kaarka MARTIDA EBT ee Washington (Washington EBT QUEST)? ... 8

Waa maxay lambarka aqoonsiga shaqsi (PIN) ee EBT? ............................... 9

Waa maxay kaar haystaha kale? ............. 9

Goormee ayaan wacaa adeegga macmiilka EBT? ..................................... 10

Maxaan ku sameyn karaa ama aan ku sameyn karin kaarkayga EBT iyo dheefaha? ................................ 11

SU'AALAHA EBT EE INTA BADAN LA ISWEYDDIIYO IYO JAWAABAHOODA ..... 13

# HORUDHAC

Cuntada Aasaasiga ah (ee federaal ahaan loo yaqaanno Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Dheeriga ah ama SNAP) wuxuu dadka ku caawiyaa in ay iibsadaan raashiinka.

Qaddar Cuntada Aasaasiga ah ee aad heli karto waxaa uu ku saleysan yahay inta uu le'eg yahay qoyskaaga, dakhliga la tirin karo, iyo kharashka bilaha sida kirada guriga, lacagaha korontada, gaaska iyo biyaha, taakulaynta carruurta, iyo kharashka caafimaadka.

Si aad u oggaato qiyaasta qaddarka Cuntada Aasaasiga ah ee bil kasta aad heli karto, wac 1-877-501-2233.



**Marka aad hesho Cuntada Aasaasiga ah waxaad sidoo kale xaq-u-yeelan kartaa barnaamijyo kale:**

- Barnaamijka raashiinka iskuulka bilaash ah ama la qiimo dhimay
- Barnaamijka nafaqada gaarka ah ee loogu talogalay Haweenka, Dhallaanka, iyo Carruurta (WIC)

Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad badan ama aad qabto su'aalo gaar ah oo ku saasan xaaladaada, wac 1-877-501-2233 ama booqo mareegtadeenna oo ah www.washingtonconnection.org/home/

## Miyaan heli karaa Cuntada Aasaasiga ah? Waa laga yaabaa, haddii aad tahay:

- Cid ku nool Gobolka Washington
- Leh dakhli ka yar 200% ee Heerka Saboolnimada Federaalka
- Buuxisa shuruudaha xaalka muwaadinnimo ama shisheeye

## Waa ayo cidda aan heli karin Cuntada Aasaasiga ah?

- Dembiilaha baxsadka ah
- Shisheeyaha sharci-darada ah

Waxaa jiri kara shuruudo kale oo ku saleysan xaaladda qoyskaaga.

## Sideen u codsadaa Cuntada Aasaasiga ah?

**Waxaa jira afar siyaabood oo loo codsado Cuntada Aasaasiga ah:**

- Online-ka oo ah www.washingtonconnection.org
- Telefoon ahaan, adiga oo aan soo gudbin codsi, oo wacaya 1-877-501-2233
- Shaqsi ahan Xafiiska Adeegga Bulshada ee DSHS ee degaanka. Bartan ka raadi CSO kuugu dhow www.dshs.wa.gov/office-locations
- Boostada:

  DSHS Customer Service Center
  PO Box 11699
  Tacoma, WA 98411-6699

Waxaad codsan kartaa codsi waraaq ah adiga oo wacaya 1-877-501-2233.

Soo buuxi ka-dibna codsigaaga buuxi sida ugu dhaqsiyaha badan aad awoodo u keen. Haddii aad u-qalanto, dheefahaaga waxaa ay ka bilaabanayaan taariikhda aad codsigaaga keento. Waxaan ka shaqeyn doonaa codsigaaga 30 maalmood gudahooda.



# Maxaa dhacaya ka-dib marka aan geeyo codsigayga?

Marka aan helno codsigaaga, waxaa lagula yeelan doonaa wareysi si aan u hubinno in aan fahanno macluumaadka ku qoran codsiga. Wareysiyada waxaa lagu qaadaa telefoonka ama Xafiiska Adeegyada Bulshada ee DSHS ee degaankaaga.

**Inta lagu guda jiro wareysiga, waxaan:**

- Kuu sharxi doonaa xeerarka uu barnaamijka leeyahay.
- Ku wayddiin doonaa su'aalo ku saabsan macluumaadka ku qoran codsigaaga.
- Ku wayddiin doonaa wax caddeynaya macluumaadka qaar.
- Ku siin doonaa nuqulka xuquuqdaada iyo mas'uuliyadahaaga.
- Kuu sharxi doonaa ujeeddada, adeegsiga habboon, iyo ciqaabta si xun u adeegsiga barnaamijka Cuntada Aasaasiga ah.
- Kuu sharxi doonaa wax kasta ee aadan fahmin.

Haddii aad caawimo ugu baahan tahay geeddi-socodka wareysiga, qof garanaya xaaladahaaga ayaa codsan kara ka-dibna la wareysan karaa isaga oo kaa wakiil ah. Qofkan waxaa loo yaqaanaa wakiilka idman.


# Maxaan la imaadaa xilliga wareysiga?

**Waa in aad keento caddeynta:**

- Aqoonsigaaga.
- Dakhliga qoyskaaga.
- Xaaladda socdaalka ee xubin kastoo qoyska ka tirsan ee aan muwaadin ahayn, oo ay ku jiraan dakhliga qofka kafaala-qaaday iyo macluumaadka khayraadka haddii la adeegsan karo.

**Waxaan sidoo kale ku wayddiin karnaa in aad keento caddaynta macluumaad kasta oo aan caddayn.**

Ka-dib waraysiga, waxaan ku siin doonaa waraaq ay ku qoran yihiin caddayn kasta ee aan weli u baahanahay. Waxaan kugu caawin doonaa in aad hesho caddaynta waxyaabaha aan u baahanahay inta lagu guda jiro waraysigaaga. Waxaad helaysaa ugu yaraan 10 maalmood oo aad ku keenayso caddaynta.



# Maxaa dhacaya haddii ay wax iska beddelaan xaaladaha qoyskayga?

Haddii qoyskaaga uu keliya qaato Cuntada Aasaasiga ah, waxaad u baahan tahay in aan noo sheegto haddii wadarta guud ee dakhliga qoyskaaga uu ka badan yahay 130% ee dhabbe-tusayaasha saboolnimada ee federaalka. Waxaan isbeddelka noogu sheegi kartaa qoraal ahaan, telefoonka, shaqsi ahaan, ama online-ka adiga oo booqanaya www.washingtonconnection.org.

Loogu talagalay qorista, cinwaanka:

DSHS-CSD Customer Service Center
PO Box 11699
Tacoma WA 98411-6699
Telefoon ahaan: 1-877-501-2233
Waa in aad soo sheegto isbeddelka 10ka bisha xigta bisha dakhligaaga uu kordhay. Tusaale ahaan, haddii aad leedahay isbeddel dhacay maanta, waa in aad soo sheegto 10ka bisha soo socota.

| Dadka Reerka | Soo sheeg haddii Dakhliga uu Ka Badan Yahay |
|---|---|
| 1 | $1,354 |
| 2 | $1,832 |
| 3 | $2,311 |
| 4 | $2,790 |
| 5 | $3,269 |



Haddii qoyskaaga uu qaato dheefo kale oo dheeri ku ah Cuntada Aasaasiga ah, waa in aad u soo sheegto si waafaqsan Xeerka Maamulka Washington ee 388-418-0005.

Waxaan qoraal ahaan laguugu soo sheegi doonaa sida isbeddelka uu u saameynayo dheefahaaga cuntada. Haddii aadan oggolaan, waxaad la hadli kartaa shaqaalaha xaq-u-yeelashada, kormeere, ama maamulaha xafiiska adeegyada bulshada. Haddii aadan weli oggolaan, waxaad wayddiisan kartaa dhageysiga maamulka la xiriira.

## Haddii aan xaq-u-leeyahay, goormee ayaan helayaa dheefahayga cuntada?

Marka koowaad ee aad codsato, dheefahaaga waxaa la bixiyaa ka-dib marka aan helno dhammaan macluumaadka aan u baahanahay si aan u go'aamino in aad xaq-u-leedahay.

- Celcelis ahaan, waxaan ku oggolaanaa codsiyada qoysaska xaqa u leh qiyaastii 10 maalmood.
- Ku dhowaad kala-bar dhammaan codsiyada waxaa lagu ansixiyaa in ka yar lix maalmood gudahooda.

Ka-dib marka lagu siiyo qaddarka bilowga ah ee Cuntada Aasaasiga ah, maalinta bisha ee aad qaadato Cuntada Aasaasiga ah isma beddeli doonto. Maalinta gaarka ah ee dheefahaaga cuntada la heli karo waxaa lagu daabacaa ogeysiiskaaga oggolaanshaha.

Dheefahaaga waxaa la heli karaa maalmaha axadda iyo sabtiga iyo fasaxyada, dheefo kasta oo aadan isticmaalin dhammaadka bisha waxaa loo wareejiyaa bisha xigta.



# Muddo intee le'eg ayaan qaadan doonaa Cuntada Aasaasiga ah?

Marka aad xaq-u-leedahay Barnaamijka Cuntada Aasaasiga ah waxaad innaga heli doontaa waraaq kuu sheegaysa:

- Haddii aad xaq-u-leedahay.
- Inta bilood ee ku qoran muddada laguu oggol yahay in aad qaadato.
- Qaddarka dheefaha cuntada ee aad heli doonto.

Marka la gaaro kala-barka muddada laguu oggol yahay in aad qaadato (lix bilood inta badan qoysaska) waxaad heli doontaa Dib-u-eegis Muddo-Dhexe oo aad buuxinayso. Waxaan u adeegsanaa warbixinta in aan ku cusboonaysiinno macluumaadka adiga kugu saabsan, dadka gurigaaga, dakhliga qoyskaaga, iyo kharashaadka qaar. Waxaa loogu talogalay in lagu hubiyo in aad qaadanayso qaddarka dheefta saxda ah. Waxaad sidoo kale dib-u-eegista kor ku xusan ku buuxin kartaa telefoonka.

Ku dhowaad 45 maalmood ka hor inta aysan dhicin dheefahaaga Cuntada Aasaasiga ah waxaad heli doontaa ogeysiis la socda foomka Dib-u-eegista Xaq-u-yeelashada oo aad buuxinayso haddii aad weli doonayso dheefaha cuntada.

Buuxi ka-dibna ku soo celi foomka Dib-u-eegista Xaq-u-yeelashada:

DSHS Customer Service Center
PO Box 11699
Tacoma, WA 98411-6699

Waxaan kuu soo diri doonaa waraaq si wareysi laguugula yeesho telefoonka ama Xafiiska Adeegyada Bulshada ee DSHS ee degaankaaga. Waa in aad dhammeyso wareysigan si aad u oggaato haddii aad xaq-u-leedahay in aad hesho dheefo cunto dheeraad ah.



## Waaxdu ma leedahay Siyaasad Takoor La'aan?

Si waafaqsan sharciga Federaalka iyo siyaasadda Waaxda Beeraha ee Mareykanka, hay'addan waxaa ka mamnuuc ah in ay sameyso takoor ku saleysan isir, midab, asalka qaran, jinsiga, da'da, diinta, aaminsanaanta siyaasadeed, ama naafonimo.

**Si aad u soo gudbiso cabasho ku saabsan takoor, warqad u soo dir:**

USDA, Director, Office of Civil Rights
1400 Independence Ave. SW
Washington, D.C. 20250-9410

ama wac 1-800-795-3272 (cod) ama 1-202-720-6382 (TTY). USDA waa daryeel bixiye iyo loo-shaqeeye bixisa fursad loo siman yahay.

## Waa maxay kaarka MARTIDA EBT ee Washington (Washington EBT QUEST)?

Nidaamka Xawilaadda Dheefaha Elektarooniga ah (EBT) waa hab ammaan ah, habboon, oo fudud oo loogu talogalay in aad hesho dheefahaaga cuntada ee bil kasta.

- Waa in aad adeegsato kaarka si aad u hesho dheefahaaga.
- Kaarka waxaa uu u shaqeeyaa si la mid ah kaarka ATM-ka, balse dheefaha cuntada ee ku jira waxaa keliya loo adeegsan karaa in cunto lagu iibsado.
- Dheefahaaga waxaa lagu shubi doonaa xisaab adiga laguu sameeyay.
- Dheefahaaga waxaa keliya la adeegsan karaa marka la geliyo lambarkaaga aqoonsiga shaqsi ee sirta ah (PIN)



## Waa maxay lambarka aqoonsiga shaqsi (PIN) ee EBT?

Waqti kasta ee aad adeegsato kaarkaaga, waa in aad geliso afar lambar ee sirta ah. Lambaradan waxaa loo yaqaanaa PIN (Lambarka Aqoonsiga Shaqsi)

**** = PIN (4 lambar oo sir ah)

**Sidan waa siyaabaha lagu heli PIN-ka:**

- Haddii aad ka hesho kaarkaaga Xafiiska DSHS ee degaankaaga waxaad xulan doontaa PIN-kaaga waqtigaasi.
- Haddii kaarka laguugu soo diro boostada – waa in aad soo wacdo Adeegga Macaamiisha si aad u xulato PIN-kaaga cusub ama beddelka ah.

Ha iska tuurin! Waxaad u baahan tahay afar lambar iyo kaarkaaga si aad u hesho dheefahaaga.

Ha ku qorin PIN-kaaga kaarkaaga dushiisa oo hala wadaagin PIN-kaaga qof aan qoyskaaga ka tirsanayn! Waxaad dhigtaa PIN-kaaga meel ammaan ah oo ha gelinin boorsada gacanta ama jeebka ee uu kaarkaaga ku jiro.

Haddii uu kaa lumo kaarkaaga ama ay waxyeello gaarto, PIN-ka weli wuu fiican yahay. Kaarka beddelka ah wuxuu yeelan doonaa isla PIN-ka. PIN-ka isma beddelayo haddii aad wayddiisato in laguu beddelo mooyaane.

## Waa maxay kaar haystaha beddelka ah?

Waxaad dooran kartaa qof kale si uu kaaga caawiyo isticmaalka dheefahaaga. Qofkan waxaa loo yaqaanaa kaar haystaha kale.

**Kaar Haystaha Kale**

- Adiga ayaa doorta.
- Waxaa uu ka heli doonaa Kaarka MARTIDA Washington (Washington QUEST) iyo PIN isaga u gaar ah xafiiska DSHS ee degaanka
- Waxaa uu awoodi doonaa in uu isticmaalo dheefahaaga.

Haddii aad doorato qof noqonaya kaar haystaha kale, dooro qof aad ku kalsoon tahay. Xasuusnow, dheefaha la xaday ama lumay in aan la beddeli doonin. Hadaad rabto macluumaad dheeraad ah ama si aad u hesho foomka oggolaanshaha, wac 1-877-501-2233.

# Goormee ayaan wacaa adeegga macmiilka EBT?

Adeegga Macamiilka ee EBT
1-888-328-9271

Lambarka War-lalinta Gobolka ee TTY
1-800-833-8388

Lambarka War-lalinta Gobolka ee Braille TTY
1-800-833-6385

**Si bilaash ah ku wac 24 saacadood maalintii, toddobo maalmood toddobaadkii marka:**

- Aad u baahan tahay in aad oggaato baaqiga ku jira xisaabtaada kaashka ama cuntada.
- Kaarkaaga uu lumo, la xado ama ay waxyeello gaarto.
- Aad doonayso in aad maqasho 10ka macaamilo ee ugu dambeeyay xisaabtaada dheefaha cuntada ama kaashka.
- Aad doonayso kaar ama PIN beddel ah in laguugu soo diro boostada.

**Wakiillada Adeegga Macmiilka ayaa sidoo kale ku caawin kara:**

- Si aad oggaato meel kuu dhow oo aad ku adeegsan karto kaarkaaga.
- Si aad u hesho taariikhda laba-bilood ee macaamiladaada.
- Si aad u soo sheegto dhibaatooyinka ATM-yada.
- Haddii aad ku hadasho luuqad aan ahayn Af Ingiriis.

# Maxaan ku sameyn karaa ama aan ku sameyn karin kaarkayga EBT iyo dheefaha?

Si qaldan u adeegsiga kaarkaaga QUEST ee washington waa dembi federaal iyo mid gobol!

### Isticmaalka Habboon


Adiga ama xubin ka tirsan qoyskaaga ayaa u adeegsan karta dheefahaaga Cuntada Aasaasiga ah in ay ku iibsadaan cuntada sida:

- Rootiga iyo badarka.
- Miraha iyo khudaarta.
- Farmaajo, caano, iyo badeecooyinka kale ee caanaha laga sameeyo.
- Hilibka, kalluunka, digaagga, iyo ukunta.
- Inta badan cuntooyinka kale ee aan loo iibin qaab cunto diyaarsan oo kulul.
- Iniinyaha iyo dhirta soo saarta cuntada.

### Isticmaal sharci darro ah

Sharci ma aha:

- In aad u adeegsato dheefaha cuntada ee ku jira kaarkaaga EBT ujeeddo kasta oo aan ahayn in cunto loogu gado xubnaha qoyska ee xaqa u leh.
- In aad ku beddelato dheefahaaga cuntada wax kasta oo qiimo leh (ka ganacsi). Tusaalooyinka ka-ganacsiga sharci-darada ah waxaa ka mid ah ku beddelashada dheefaha cuntada lacag kaash aj, wax kasta oo aan ahayn in cunto looga iibsado tafaariiqle idman ama la oggol yahay.
- In aad siiso dheefahaaga qof aan ku jirin qoyskaaga Cuntada Aasaasiga ah.
- In aad u isticmaasho dheefahaaga Cuntada Aasaasiga ah in aad ku iibsado agab aan cunto ahayn sida saadka qoyska, fitimiinno, cuntada xayawaanka rabaayada ah, daawo, sigaar iyo tubaako, ama khamril.



**Ciqaabta isticmaalka sharci-darrada ah. Waxaa laga yaabaa:**

- In aadan xaq-u-yeelan iyo in aad ku wayso dheefahaaga ugu yaraan hal sano ilaa noloshaada oo dhan. Xaq-u-yeelasho la'aanta ayaa soconaysa xataa haddii aad u guurto gobol kale.
- In uu kugu waajibo qanaax.
- In ay kugu waajibto tallaabo sharci in lagaa qaado, oo ay ku jirto dacwad ciqaabeed. DSHS waxaa ay kala shaqeyn doontaa mas'uuliyiinta dacwad-oogayaasha degaanka, gobolka iyo kuwa federaalka si dacwad loogu soo oogo kuwa ka-ganacsada dheefaha Cuntada Aasaasiga ah ama SNAP.

## Dheefahaaga waqtigii loogu talogalay isticmaal

Dheefahaaga gargaarka cuntada waxaa loogu talogalay in ay haqabtiraan baahiyada hadda ee qoyskaaga.

Waxaa laga yaabaa in aan baajino xisaabtaada Cuntada Aasaasiga ah haddii aadan wax ka isticmaalin 365 maalmood gudahooda.

Su'aal: Miyaad ku adeegsan kartaa kaarkaaga EBT meel ka baxsan gobolka?

Jawaab: Kaarka MARTIDA Washington (Washington QUEST) waxaa aqbala tafaariiqleyda ka qaybgalaysa barnaamijka EBT ee dalka oo dhan. Ka eego calaamadda QUEST ama wayddii dukaanka ka hor inta aadan isku-dayin in aad isticmaasho kaarkaaga QUEST. Dukaamada iibiya cuntada waxaa laga yaabaa in ay ka qaybgalaan ama ka qaybgelin bixinta dheefaha lacagta kaashka ah.

Su'aal: Miyaad celin kartaa wax aad kaarka ku iibsatay?

Jawaab: Haa! Tusaale ahaan: haddii caano aad hadda iibsatay ay xumaato, waxaad dukaanka dib ugu soo celin kartaa caanaha xumaaday iyo rasiidka dukaanka. Xisaabtaada cuntada ayaa dib loogu celiyaa wixii soo noqda. Kaash ahaan uma qaadan kartid wixii la celiyo haddii shayga lagu iibsaday dheefaha cuntada.

Su'aal: Miyaan kaash dib-uga-heli karaa dheefaha cuntada ee ku jira kaarkyaga EBT?

Jawaab: Maya. Dheefo cunto kasta ee aadan adeegsan dhammaadka bisha waxaa la heli karaa bisha xigta.

Su'aal: Haddii aan ka guuro gobolka, miyaan sii qaadan karaa Cuntada Aasaasiga ah?

Jawaab: Cuntada Aasaasiga ah waxaa keliya loogu talogalay dadka deggan gobolka Washington. Waxaad u baahan doontaa in aad ka wacdo xarunta adeegga macmiilka 1-877-501-2233 si aad u xirto kiiskaaga sidaa darteed waxaad ka codsan kartaa dheefaha Barnaaamijka Gargaarka Nafaqada Dheeriga ah (SNAP) gobolka aad hadda ku nooshahay. Waxaad weli adeegsan kartaa dheefaha lagu bixiyay kaarkaaga EBT intii aad Washington ku noolayd.

USDA waa daryeel bixiye, loo-shaqeeye iyo amaah-bixiye bixisa fursad loo siman yahay. Hay'adan waxaa ay bixisaa fursad loo siman yahay.

Take a Fresh Look

Basic Food

DSHS 22-297 SM (Rev. 4/20) Somali